



Tukwila
SCHOOL DISTRICT

MASHRUUCYADA DHISMAHA

Janaayo 2022

Liliana Cardenas, Agaasimaha Dayactirka, Hawlaha & Mashaariicda
Caasimada

MASHRUUCYADA DEGMADA EE MUDNAANTA LEH

Tukwila SD waxay jeclaan lahayd in aan horay ugu sii wadno mashaariicda mudnaanta leh ee degmadeena.

- Dhammaan mashaariicda lagu maalgelinayo sanduuqa Mashaariicda Caasimadda.
- Baahiyaha gaarka ah ee mashruuc kasta ayaa la kala hormarin doonaa.

Mashaariicda Mudnaanta Sare Leh

1. Dib U Habeynta Jikada Showalter
2. Dib U Habaynta Xarunta Fanka (Performing Arts Center, PAC) ee Foster
3. Deyrka Amniga ee Garoonka Neudorf
4. Waddo Bulsheed laga dhisayo Showalter MS

DIB U HABAYNTA JIKADA SHOWALTER

- Jikada Wax Soo Saarka
 - Adeegyada Showalter oo u sameeya cuntooyin gaar ah oo loogu talagalay dhammaan saddexda dugsi hoose.
 - Waxay karisaa turki fasaxa dhammaan shanta dugsi Noofembar iyo Disembar kasta.
- Walaaca
 - Inta badan qalabka iyo alaabaha jikada lagama maarmaanka ah waxay yaalaan in ka badan 18 sano, ma shaqeeyaan, ama si yar ayey u shaqeeyaan, waana qalab ka soo haray dugsiyada kale.
 - Aagga jikada yar – dhibaato dhanka bullaacadaha iyo kala qaybiyaha saliida/biyaha.

DIB U HABAYNTA JIKADA SHOWALTER

- Dhibaatooyinka Jira
 - Qaybaha kaydka waa qadiimi weyna soo daadanayaan
 - Heerkulka foornada iyo kuleyliyeyaasha ayaa ah kuwo aan joogto ahayn oo qaarkood ma lahan saacadaha shaqeeya
 - Makiinada saanwijka ma laha awood uu ku ilaaliyo heerkulka saxda ah maadaama uu ka samaysan yahay caag
 - Kuleyliyayaasha caanaha waa qadiimi waxayna leeyihiin cod aan wanaagsaneyn
 - Inta badan qalabka xawaaraha/rootiga waxay leeyihiin qaanado jajabsan
 - Armaajooyinka jikada ee guriga ayaa suran jikada
 - Jalmadyaasha waxay u baahan yihiin in la beddelo – ma shaqeynin sanadka oo dhan, kuleliyaha hadda si fiican uma shaqeeyo.

Jalmadyaasha waxaa sida caadiga ah la isticmaalaa toddobaad kasta, mararka qaarkood maalin kasta. Waxa loo isticmaalaa in lagu sameeyo alaabta cuntada ee Showalter iyo dugsiyada hoose sida hilibka taco, baasto, iyo suugo.

DIB U HABAYNTA JIKADA SHOWALTER

Talooyinka Mashruuca

- Dib u habeyn ku sameeynta jikada oo ay ku jiraan cusboonaysiinta qalabka si loo beddelo qalabka duugga ah.
- Sahaminta ikhtiyaarada qalabka ee saxanka ansalaatada, saxanka saanwijka, qaybaha qaboojinta, iyo qalabka la carte.
- Qiimaynta qulqulka khadka adeega

Qiimaha Mashruuca

- Qiyaastii ku dhowaad \$1.5M.
- Qiyaasta qiimaha dhabta ah ayaa la heli karaa ka dib oggolaanshaha isticmaalka doolarka mashruuca dhismaha ee haray.

DIB U HABAYNTA FOSTER PAC

- Qayb ka mid ah dhismaha dugsiga ee asalka ahaa ee la dhisay 1991.
- Adeegsiga PAC:
 - Tijaabada ardayga
 - Xafladaha abaal marinta
 - Goob tababar oo loo adeegsado barnaamijyada tiyaatarka iyo muusiga
 - Waxaa si kala duwan u adeegsado macallimiinta iyo shaqaalaha
 - Waxaa kireysto bulshada iyagoo u adeegsada xaflado kala duwan sida tartamada qoob ka ciyaarka, kulano diimeedyo kala duwan, iwm.
 - Riwaayadaha iyo tababarada Rainier Symphony

DIB U HABAYNTA FOSTER PAC

Talooyinka Mashruuca:

- Nidaamyada waaweyn – dhawaaqa iyo nalka ayaa duugoobay oo si fiican ayey uga dambeeyaan heerarka warshadaha. Dayactirka looga baahan yahay nalalka iyo qaybaha korontada
 - Ku talinta cusboonaysiinta muuqaalka, nidaamka maqalka iyo nalka.
- Beddelidda Kuraasta
- Cusboonaysiinta Nidaamka Xargaha
- Dhulka Shamiindada ah – nadiifin qoto dheer

DIB U HABAYNTA FOSTER PAC

Qiimaha Mashruuca

- Qiyaastii ku dhowaad \$2M.
- Qiyaasta qiimaha dhabta ah ayaa la heli karaa ka dib oggolaanshaha isticmaalka doolarka mashruuca dhismaha ee haray.
- Iskaashiga suurtagalka ee lala yeesho Magaalada Tukwila
 - Qandaraaska hadda ee Magaalada Tukwila wuxuu dhacayaa 2032-ka

DEYRKA AMNIGA EE GAROONKA NEUDORF

Taariikhda

- Garoonka Neudorf wuxuu hadda u furan yahay dadweynaha – heshiis u dhexeeya Degmada iyo Bulshada
 - Waddo ayaa diyaar u ah dadweynaha si loogu isticmaalo socodka iyo orodka.
- Garoonka Neudorf wuxuu diyaar u yahay kiro dadweyne.

Dhibaatooyinka Amniga

- Guud ahaan amniga hantida ee ka ilaalinta burburka iyo jajabka; iyo dayactirka waddada iyo garoonka.

DEYRKA AMNIGA EE GAROONKA NEUDORF

Walaaca Amniga ayaa sii socda

- Burbur ku yimaadda goobta ayaa ka sarraysa heerka caadiga ah sababtoo ah isticmaalka dadweynaha ee baaskiilka, mootooyinka, iyo baaskiillada.
- Dusha sare ee jidka oo si xawli ah u burbura sababtoo ah isticmaalka joogtada ah.
 - Caadi ahaan waa la beddelaa 9-kii sanaba mar, laakiin hadda waxaa sameeyaa 3-dii sanaba mar.
- Burbur joogo ah, qoraalka farshaxanka iyo nalalka jajabsan.
- Walaaca badbaadada ardayda iyo shaqaalaha, oo ay ku jiraan waardiyaasha habeenkii.

DEYRKA AMNIGA EE GAROONKA NEUDORF

Talada Mashruuca

- Ka xiritaanka Garoonka Neudorf ee adeegsiga dadweynaha
 - Garoon dugsi oo xiran ayaa ku badan degmooyinka ku xeeran (Seattle, Highline, Renton).
- Ku daridda 8 fiit dhererka deyrarka qurxinta ee agagaarka Garoonka.
- Ka dhisidda Jidka Bulshada cusub ee Showalter MS si loo ilaaliyo heshiiska bulshada.

Qiimaha Mashruuca

- Qiyaastii \$450,000 deyrka Garoonka Neudorf iyo dariiqa bulshada cusub.

JIDKA BULSHADA

Codsi soo jeedin

- Dhisidda/samaynta waddo cusub oo bulsheed oo ka dambaysa Dugsiga Dhexe ee Showalter si loo ilaaliyo heshiiska bulshada si loo sameeyo waddo socod/orod, taasoo u furan dadweynaha guud oo la heli karo mar kasta.

Goobta – Showalter ama Foster

- Dib u eegis taxadar leh oo ku saabsan wareegyada garoonka baysboolka ee Showalter iyo garoonka soofboolka ee Foster
- Garoonka kubbadka baysboolka ee Showalter ayaa ah ikhtiyaarka ugu macquulsan sababtoo ah raad weyn, isbeddelada heerka iyo qalooca oo yar, dhulka oo sahlan in wax laga beddelo, iyo dhaqdhaqaaqa dugsiga oo yar marka la barbardhigo garoonka soofboolka ee Foster.

JIDKA BULSHADA

Xiriirka Dadweynaha

- Xiritaanka isticmaalka dadweynaha ee Garoonka Neudorf iyo furitaanka Waddada Bulshada in si ballaaran looga la xiriiro bulshada guud:
 - Websaaydka degmada
 - Boorka qoraalka ee Foster
 - Baraha bulshada
 - Buug-yarayaasha
- Calaamadaha garoonka Neudorf oo muujinaya xiritaankiisa isticmaalka dadweynaha iyo jihooyinka goobta loo maro dariiqa cusub ee bulshada.

Qiimaha Mashruuca

- Qiyaastii \$450,000 deyrka Garoonka Neudorf iyo dariiqa bulshada cusub.

JINSIGA IYO SINNAANTA

Si loo hubiyo in mashaariicdan lagu arko su'aalaha midabka iyo sinnaanta ah, waxaan jawaab celin ka raadinaynaa shaqaalaha, bulshada, iyo ardayda. Ka qayb qaadashadaada sahanka gaaban waa muhiim.

- Linkiga sahanka: <https://www.surveymonkey.com/r/F5C96BW>

(Koobi garee linkiga oo beest ku dheh barowsarkaaga)

- Faallooyinka iyo su'aalaha
 - Liliana Cardenas oo laga heli karo cardenasl@tukwila.wednet.edu
 - Maricel Haessig oo laga heli karo haessigm@tukwila.wednet.edu

Waad ku mahadsan tahay
waqtigaaga!

JINSIGA IYO SINNAANTA

Fadlan ka jawaab su'aalahan soo socda ee khuseeya mid kasta oo ka mid ah afarta mashruuc ee ku jira bandhigga Mashaariicda Dhismaha iyada oo loo marayo Su'aalaha Jinsiga iyo Sinnaanta. Ka qayb qaadashadaada sahankan waa noo muhiim.

Su'aalaha

1. Ma jiraan saamayn aan wanaagsanayn oo ku wajahan kooxo sifooyin gaar ah ee ardayda, oo ay ku jiraan kuwa barta luqadda Ingiriisiga iyo ardayda baahiyaha gaarka ah qaba?
 Haa
 Maya
 Waa laga yaabaa (fadlan sheeg) _____
2. Waa maxay faa'iidooyinka la rajaynayo?
3. Waa maxay cawaaqibta aan la qorshayn, haddii ay jiraan?
4. Sidee bay u ekaan lahayd haddii talooyinkan ay xaqiijin lahaayeen sinnaanta waxbarashada iyo jinsiyadda ee arday kasta?